

Qoraalka oo af-finnish laga turjumay laguna turjumay af-soomaali.

Gunaanad: Dab ka dhashay guri dabaq ah oo ku yaalla Hakunila, Vantaa oo keenay in shan qof ay ku geeriyoodaan 8.10.2023 8.10.2023 (Y2023-02)

Hakunila, Vantaa guri dabaq ah oo ku yaalla ayuu dab ka dhashay sawnada subaxnimadii 8.10.2023, waxaana ku geeriyooday shan qof. Fiidnimadii ka horreysay ayaa si aanan ku talo gal ahayn loogu buuxiyay in ay shidanto sawnadu, taasina waxaay keentay in habeenimadii sawnadu ay daarantay oo ay kululaysay darbigii alwaaxa ee ka dambeeyay burjikada sawnada illaa uu dab qabsaday darbiga.

Waalidka qoyskaas oo lix qof ka koobnaa ayaa ku soo baraarugay dhawaaqa dabsheegaha. Hooyada qoyska iyo afar carruur ah oo 2-7 sano da'doodu u dhaxeysay way ku guuleysan waayeen inay guriga ka baxsadaan. Labada waalidba waxaay ka soo jeedaan Soomaaliya, halkaas oo uu aabaha qoysku ka yimid dhammaadkii 1990-ka hooyaduna ay ka timid sannadkii 2018-ka.

Baadhitaanka waxaa lagu ogaaday in burjikooyinka sawnooyinka badankoodu sida loo daaraa ay fududdahay. Farsamooyin ilaalinaya ammaanka sida qofulka carruurta iyo kuwo la midana badanaa ma laha. Burjikada sawnada badanaa si fudud loogama arko in uu daaranyahay ama in wakhti uu daarmo lagu buuxiyay.

Dhagaxaanta burjikada sawnada dib looma raseyn sida ay u muuqatayna sanaddo badan lama baddalin. In dhagaxaantu is xoqaan, is cadaadiyaan ama burburaan waxaay xadeysaa wareega hawada ee dhagaxaanta dhex marta, taasina waxaay keentay in kuleylka dhex marayaa aanu sawnada burjikadeeda ku eekaanin. Burjikada ayaa aad u kululaatay wuxuuna kuleylkaasi keenay in darbiga alwaaxa ah ee ka dambeeya burjikada sawnada uu dab ka dhasho. Saameynta dib u raseynta iyo beddalaadda dhagaxaanta burjikadu uu u leeyahay ammaanka dabka mid in ku filan la aqoonsaday ma aha. Ma jirto caado loo joogteeyay dib u raseynta iyo beddalaadda dhagaxaanta.

Ammaanka sawnada elektirooniga ah waa mid sida badan ku salleysan waxqabadka qofka isticmaalaya, taas macnaheedu waxa weeyaan in khaladaadka isticmaalka ku yimaaddaa ay keeni karaan khatar halis ah oo daran. Kahor tagga ama yareynta saameynta ay khaladaadkaas yeelan karaan waa wax badanka ku sal leh digniinaha ku qoran hagitaanka isticmaalidda, in ku filanna lama adeegsado xalalka farsamo ee kuwaas la xidhiidha.

Waxaa cad in hooyada qoyskaas aqoonteeda ku saabsan ammaanka nolosha maalinlaha ah iyo deggenaanshuhu uu ahaa mid dhiman. Qofka qoyska isku keenay ee isaguba dalka soo degay mararka qaar ma awoodo inuu warbixin ku filan bixiyo.

Dhibaatadu waxaay ka dhacday soone hore loo ogaa in diyaar ahaanta badbaadinta ee waaxda badbaadadu ay ahayd mid aanan dhammeystirnayn. Waxqabadka lagu saxayay god-dalooladaas waa la bilaabayba, laakiin waxqabadka lama dhameystirin. Soonaha oo dhismeyaal badan oo cusub laga waday in lagu horumariyo awoodda waxqabad ee waaxda badbaadinta waxaay u baahnayd in la aasaaso ilo-awoodeedyo cusub, tusaale ahaan in la dhiso xarun cusub oo dabdamis, taasina wakhti badan ayaay qaadanaysay.

Gurmadka degdegga ah iyo daryeelka hore markii hore warbixin buuxda kamay haysanin dadka uu dabku saameeyay tiradooda, taasina waxaay dib u dhac ku keentay u wacidda ambulaansyada. Roondada booliska ee markii ugu horreysay goobta timid ayaa shabakadda Virke ee ay ku wada hadlaan sarkaalada kala duwan, ka dhex gudbiyay dadka uu dabku saameeyay tiradooda saxda ah. Warbixintaasi waxaay ku dhex luntay isgaarsiintii kale ee socotay. Warbixintaas oo muhiimad wayn lahayd inay gaadhay ciddii loogu talo galay lama hubinin oo xaqiijin lama codsanin.

Baadhitaanka waxaa lagu soo saaray labo talo-bixin. Xarunta baadhitaanka shilalku waxaay ku talinaysaa in

Qoraalka oo af-finnish laga turjumay laguna turjumay af-soomaali.

1. Wasaaradda arrimaha guduhu ay la shaqeyn kala yeelato laamaha kale ee ka shaqeeya isgaarsiinta ammaanka la xidhiidha oo ay ka warbixiyaan isticmaalka ammaanka ah ee burjikada sawnada iyo saameynta ay ammaanka dabka u leedahay in si joogto ah loo daryeelo.. (2025-S8).
2. Ururka SESKO ry ee istandaaraynta farsamada korontada ee dalku inuu horumariyo shuruudaha ammaanka burjikooyinka korontada ku shaqeeya si loo horumariyo qaab isticmaalka daaro-damiyeyasha burjikooyinka. Sidoo kale waa in la horumariyaa shardiyada ammaanka qaabsameyska la xidhiidha si looga hor tagi karo in burjikadu ay kululaato ay keento in uu dab qabsan karo waxyaabaha kale ee hareerahiisa ka dhisan, iyadoonay ku xidhnayn qofka isticmaalaya. (2025-S9)